Hallo
Basel-Stadt

Kanton Basel-Stadt

# Lacagta iyo Canshuuraha

Sanduuq Bangi / Dhaqdhaqaaqa lacagaha
Canshuuraha
Deynta
Ku noolaanshaha Lacag yar

# Sanduuq Bangi / Dhaqdhaqaaqa lacagaha

Qofkii shaqaysta lacag oo ay tahay inuu bixiyo biilal, wuxuu u baahanyahay Bangi ama Boosto. Wax ka iibsiga onlineka waxaa la isticmaala Kaararka Debitka ama Kreditka.

## Sanduuq Bangi

Qiyaastii dhammaan dadka degan wadanka Swiseerlaan oo dhan waxay leeyihiin Sanduuq bangi. Shaqaalaha sida caadiga ah waxaa loogu soo shubaa mushaharkooda Sanduuqa bangiga. Bangiyo iyo Boosto fara badan ayaa bixiya adeegga sanduuqyada gaarka ah. Furashada sanduuqa caadi ahaan waa mid bilaash ah. Laakin waxaa dib la isaga qaada lacagaha khidmada. Khidmada, ribada iyo adeegyada wey ku kala duwanyihiin qiimahooda adeeg bixiyaasha. Hadaba waxaa fiican in isbarbardhig lasameyo. Furashada Sanduuqa waxaa loo baahanyahay oo lagama maarmaan ah baasaboorka qofka ama kaarka aqoonsiga.

## Kaarka Debit / Kaarka Kredit

Qofkii haysto sanduuq caadi ahaan wuxuu helaa kaar bangi si uu lacagaha ula soo baxo. Kaarka waxaa lacagaha lagala bixi karaa isla bangiga aad ka sameysatay kaliya. Bangiyada iyo Boostada waxay bixiyaan sidoo kale kaararka Debitka ah (Tusaale ahaan Maestro) oo lacagaha lagala bixi karo dhammaan mashiinada bangiyada kale oo dhan inta badana lagu bixin karo dukaamada. Kaararkan waxa sidoo kale lagu isticmaali karaa dibadda. Hadba nooca kaarka uu yahay ayaa la bixiyaa khidmado kala duwan. Kaararka kredit ka waxaa laga dalban karaa bangiyo kala duwan. Adeegyada iyo khidmadaha si aad ah ayay u kala duwanyihiin. Hadaba waxaa fiican in isbarbardhig la sameeyo. Ku bixinta lacagaha kaararka Debitka ama Kreditka waayadan dambe waa kuwo aad u baahay.

## Bixinta biilasha

Lacagaha Biilasha (Rechnungen) caadi ahaan waxaa la isugu diraa boostada ama I-Meeyl. Waxaa jiro saddex qaab oo lagu bixiyo:

- Qaab Online ah: Ku bixinta lacagaha Interneeta waa mid si xoogan u baahday oo aamin ah.
- Xafiiska: Warqadda ku bixinta lacagaha ayaa lala tagi karaa Boostada si aad ugu shubato lacag kaash ah sanduuqaada. Qofkii haysto sanduuq boosto waxuu si toos ah uga bixin karaa biilka sanduuqisa. Macaamiisha bangiyada iyagana sidoo kale waxay tagi karaan xafiisyada bangiyadooda si ay bixiyaan biilasha.
- Boostada: Bixinta lacagaha waxaa si qoraal ahaan ah loogu diri karaa Bangiyada ama boostada. Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa Bangiga ama Boostada.

Qaababka lagu bixiyo lacagaha joogtada ah:

- Si toos ah in lagaaga gooyo (LSV): Habkan waa hab fudud sababtoo ah biilasha waxay si toos ah uga go ayaan sanduuqada. Warbixin dheeraad ah waxaad kahelaysaa dadka kuusoo dirsado biilasha, bangiga ama boostada.
- Hadii qiimaha lacagaha biilashu yihiin kuwo mar walbo iskumid ah (Tusaale, kirada guriga), waxaa laga sameeysan karaa Bangiga ama boostada, adeegga bixinta joogtada ah (Dauerauftrag).

Lacagaha Biilasha mar walbo waxay leeyihiin muddo cayiman oo ay tahay in lagu bixiyo. Haddii la ilaalin waayo mudadaas, waxaa laguu galin karaa: Buugga Deymaha (Betreibung).

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/geld-und-steuern/konto--zahlungsverkehr

# Canshuuraha

Canshuuraha laga uruuriyo Swiserlaan waxay ku xirantahay hadba meesha aad ku nooshahay. Canshuuraha ugu muhiimsan ee laga qaado shaqsiyaadka gaarka ah waa dakhliga, hantida iyo Canshuurtaha qiimaha dheeraadka ah.

## Nidaamka Canshuurta

Wadanka Swiserlaan, Dowlada federaalka ah, dowlada hoose, degmooyinka iyo Bulsho diimeedyada waxay qaadaan canshuuro. Waxaa loo kala qaadaa canshuur toosan iyo mid aan toos ahayn. Canshuuraha tooska ah waxaa ugu muhiimsan canshuuraha Dakhliga iyo hantida waana in dadka canshuuraha ku waajibeen ay si toos ah u bixiyaan. Canshuuraha aan tooska ahayn waxaa soo galayo Canshuurta qiimaha dheeraadka ah, Canshuurta tubaakada ama shidaalka. Canshuurahan waxay ku xiranyihiin qiimaha ay alaabta. Maadama canshuuro badan ay mas'uul ka yihiin dowladaha hoose iyo degmooyinka, ayaa qiimaha canshuuraha tooska ah ee deegaanada farqi weyn ugu dhexeeyaa. Dadka isqaba si wada jir ah ayaa loo canshuuraa.

## Canshuurta Dakhliga

Ajaanibta soo dagtay wadanka waxaa si toos ah looga jaraa mushaharkooda canshuurta dakhliga soo gala (Quellensteuer). Buuxinta canshuurtan waxaa u sameeya shaqaalaha maamulkooda goobta shaqada.

- Qiimaha canshuurta waxay ku xirantahay Dakhliga, Xalada Qoyska (Iskaabulo, xaasle, garoob), inta caruur u joogto. Waxii isbadal ah ee soo kordha waa in si dhaqsa ah loo soo sheegaa.
- Canshuurta Dakhliga waxaa sidoo kale macquul ah in wax yaabo dheeraad ah laga gooyo, tusaale ahaan keydka Tiirka 3-aad, Ribooyinka deynta, qarashaad badan oo ku baxa xanuunada iwm..
- Qofkii haysto hanti, waa inuu soo sheegaa si gooni ahna uga bixiyaa canshuurta.
- Dakhli sanadeed kabadan 120'000 oo Faran waa in la buuxiyaa canshuuraha caadiga ah (ordentliche Besteuerung).
- Qofkii qabo lammaane haysto dhalashada Swiserlaan ama Dalku Jooga C, waa inuu sidoo kale buuxiyaa canshuuraha caadiga ah (ordentliche Besteuerung).

Maamulka Canshuuraha Gobolka (Kantonale Steuerverwaltung) waxuu idin la wadagaayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Canshuuraha Dakhliga. Maamulka Canshuuraha Gobolka waxuu kaa caawinayaa su'aalaha kusaabsan Canshuuraha Hantida.

## Canshuurta Caadiga ah

Dadka haysta dhalashada Swiserlaan ama Dalku Jooga C waxaa laga qaadaa canshuurta caadiga ah (ordentliche Besteuerung). Taas micnaheeda waa in canshuurtooda laga gooynin Mushaharkooda. Waa inay sameeyaan canshuur buuxis kadibna u bixiyaan sida biilasha. Canshuurta caadiga sidoo kale waxaa laga buuxin karaa qadka onlineka. Waxaa lagu taliyaa in lacagaha canshuurta lasii hormariyo (Vorauszahlung). Qiimaha lacagta canshuurta aad bixin doonto waxaa lagu xisaabsan karaa xisaabiyaha canshuurta (Steuerrechner). Buuxinta canshuurta sidoo kale dadka u dhashay wadanka ee Swiiska ah ayay ku adagtahay. Waxaa fiican in aad raadsato qof kaa caawiyo buuxinta haddii ay tahay markii kugu horeysay aad buuxinayso.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/geld-und-steuern/steuern

# Deynta

Haddii lagu bixin waayo lacagaha biilasha waqtigii loogu talagalay waxaa lala kulmi karaa caawaqib xumo dhab ah. Xarumaha latalinta deymaha waxaa laga helaa caawimaad ku saaabsan dhibaatoyinka dhaqaale.

## Digniinta iyo Diiwaanka Deymaha

Qofkii ku bixin waayo biilasha waqtigii loo qabtay waxaa marka hore sida caadiga ah loo soo diraa digniinta koowaad iyo digniinta labaad (Mahnung). Qofka ama shirkadda deynta kugu leh waxaa marwalibo u furan inay ku geliyaan diiwaanka deymaha (Betreibung). Xaaladan oo kale qofka deemeysan waxaa amar lacagta inuu bixiyo ah looga soo diraa Hay'adda qaabilsan deeymaha (Betreibungsamt). Waxaa sidaas kugu sii kordhayo lacago kale. Qofkii aaminsan in si qalad ah lagu galinayo diiwaanka, si sharci ah ayuu kaga doodi karaa (Rechtsvorschlag) hay'adda diiwaanka deymaha. Fiiro gaar ah: Diiwaanka deynta waxuu horseedi karaa in mushaharka aad ku shaqeyso qeyb badan oo kamid ah loo qaato deyntaas ama alaab qaali ah haddii ay kuu taalo lagaa qaato. Sidoo kale waxa si rasmi ah laguu galinayaa (Betreibungsregister) galka deymaha (xataa deyntii hadaad iska bixiso kadib). Caqabad ayay midaas ku noqon kartaa markaad Guri raadsanayso.

## Deynta

Qofkii walwal dhaqaale ama deyn ah qabo, waxuu la xiriiri karaa Xarunta latalinta Deymaha (Schuldenberatungsstelle). Halkaas waxuu ka helayaa caawinaad. Khabiiro ayaa si wada jir ah ula eegayo dadka talo doonka ah xaaladooda iyo xalkooda. Ururka Kaaritaaska waxuu ku bixiyaa sidoo kale talo bixin qarsoodi ah lambarka taleefanka: "SOS-Deymaha" Qadka latalinta 0800 708 708 ( wicitaanku waa bilaash). Hadii loo baahdo waxay kugu wareejinayaan xarumo kale. Caawinaad iyo macluumaad ku anfaco waxaad ka heli kartaa Xarunta latalinta ee Plusminus.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/geld-und-steuern/schulden

# Ku noolaanshaha Lacag yar

Nolosha wadanka Swiserlaan waa mid qaali ah. Sidaas darteed waxaa wanaagsan in alaabaha qaar iyagoo celis ah la iibsado. Qofkii xaalad dhaqaale ku jiro waxuu kaga iibsan karaa dukaamada qaar qiimo raqiis ah.

## Alaabaha Celiska ah

Wadanka Swiserlaan waxaa jiro goobo badan oo lagu iibiyo waxyaabo lasoo isticmaalay (Brockenhäuser). Halkaa waxaad qiimo jaban ku heli kartaa alaabaha celiska ah. Suuqyada qaar ayaa ka iibiyo dadka shacabka ah alaabaha horey looso isticmaalay. Tusaale ahaan Suuqyada (Flohmärkte), suuqa huudheyda, suuqa alaabaha ciyaaraha barafka ee celiska iwm. Sidoo kale barta internetka waxaa aad loo jecelyahay iibgeynta iyo iibsashada alaabaha celiska.

## Ciyaaraha / Dhaqanka / Tacliinta

Kaarka-KulturLegi waxay qiimo jaban ku iibsan saraan dadka aan dhaqaale ku filan haysan munaasabahada kala duwan ee Waqtiyada fasaxa, Ciyaaraha, dhaqanka iyo tacliinta. Kaarkan waxaa laga dalban karaa Kaaritaaska. Kaaritaas ayaa hubinaya go'aana ka gaaraya qofkii lasiinayo kaarka. Kaarka Familienpass, Kaarka FamilienpassPlus ama kaarka colourkey sidoo kale waxyaabo badan ayaad ugu adeegan kartaa qiimo jaban.

## Dukaanka Kaaritaaska

Dadka aan haysan dhaqaale ku filan waxay ka iibsan karaan cuntada iyo adeegyada maalinlaha ah, Dukaamada Kaaritaaska (Caritas Markt) iyagoo iska bixinaya kharashaad aan badnayn. Waxaa jiro kaar lagu iibsado oo in laga dalbado ay tahay Kaaritaas. Dalabka kaarka waxaa soo xaqiijinayo inaad xaq uleedahay Kaaritaaska. Basel waxaa kuyaalo dukaan kaaritaaska leeyihiin.

## Kaalmada dowladda

Qofka aanan haysan dhaqaale ku filan waxuu xaalado badan xaq u yeelanayaa kaalmo dowli ah. Tusaale ahaan waxaad dalban kartaa raqiisinta Qarashaadka Ceymiska Caafimaadka ama Taagerada waxbarashada. Xaaladaha qaar waxaa la isasiiyaa lacagaha Ceymiska Bulshada ama kuwa Ceyrta. Qoysaska aanan haysan dhaqaale badan oo ku filan waxay dalban karaan Lacagaha Kaalmada kirada guryahooda (Familienmietzinsbeiträge).

**Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)**

www.hallo-baselstadt.ch/so/geld-und-steuern/leben-mit-wenig-geld